C

IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 29 Maarso 1980 — L. 2 R 3

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba RUKUNKA : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsàaràddà Làcagta.

*KOOBNIIN*

*QAYBTA KOOWAAD*

SHARCI

SHARCI L. 8 ee 3 Feb. 1980, waxaa la meel mariyey Dacwadaha ku saabsan Kirada Guryaha. — Boga 357

SHARCI L. 9 ee 18 Mar. 1980 Toosin iyo wax ka baddelid Sharciga horumarinta Iskaashatooyinka ee L. 40 soona baxay 4.10.1973 » 358

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 46 ee 23 Maar. 1980 Cafis doonta Maxkamadda Badbaadada ka Hantiguurisay Jaalle Cabdulcasiis Yaxye Al-Kidi oo Cumaan ah » 360

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 47 ee 2 Maarso 1980, Magacaabid Maareeye Guud ee Mashruuca Caanaha Banaadir. » 361

Wakaaladda M. Qaranka

LIBRARY NAIROBI

ABDIHAK OMAR عبد الحق عمر

SHARCIGA L. 9 ee 18 Maarso 80 Toosin iyo wax ka baddalid Sharciga Horumarinta Iskaashatooyinka ee L. 40 soona baxay 4.10.1973

ISAGOO ARKAY: Qodobada 41,111 iyo 113 ee Dastuurka J.D.S

ISAGOO ARKAY: Sharciyada L. 17,18,iyo 19 ee 1.7.76

ISAGOO ARKAY: Sharciga lagu dhisay Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

ISAGOO AQOONSAN: Iney tahay lagama maarmaan in wax laga bedelo Sharciga Horumarinta Iskaashatooyinka Soomaaliyeed oo loo xilsaaray Ururinta iyo maamulidda Iskaashatooyinka Dalka oo dhan.

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aankii Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda.

Qodobka 1aad

1. Ayadoo Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed xil uga saaran yahay inuu kulmiyo, Ururiyo, maamulana dhammaan Iskaashatooyinka dalka waxaa awooddii Wasaaradaha ay k ulahaayeen Iskaashatooyinka ee ku tilmaaman sharciga 40aad ee soo baxay 4.10.1973. lagu wareejiyey UDHIS.

2. Sidaas daraadeed wixii qalab, farsamo iyo shaqaalaba ee la xiriira Iskaashatooyinka ee hoos imaanayey Wasaaradda, waxaa lagu wareejiyey Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed wuxuu awood u leeyahay inuu si toos ah uu u dhoofiyo xoolaha iyo badeecadda ay soo saaraan Iskaashatooyinka isagoo la kaashanaya Hey'adaha Dowladda ee ku shaqada leh ganacsiga iyo dhoofinta badeecdda.

ABDIHAK OMAR عبد الحق عمر

## Qodobka 3aad

Waxaa la tirtiray Qodobada sharciga horumarinta Iskaashatooyinka ee ka horyimaada sharciga lagu dhisay UDHIS iyo sharcigaan.

## Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho 18 Maarso 1980

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

ABDIHAK OMAR عبد الحق عمر